# U SINAANSHAHA FURSAD WAA SHARCIGA

Waa sharci daro in qaataha kaalmada maaliyadeed ee Dawlada dhexe in lagu takooro waxyaabaha soo socda: ka dhan ah qof kasta oo ku sugan Mareykanka, iyadoo lagu salaynayo isir, midab, diin, jinsi (oo ay kamid yihiin uurka, dhalmada, iyo xaaladaha caafimaad ee la xiriira, fikradaha laga qabo galmada, badelitaanka jinsiga, iyo aqoonsiga jinsiga), wadanka u dhalasho (oo ay kamid tahay aqoonta Ingiriisiga xadiddan) da'da, naafanimada, ama xiriir siyaasadeed ama caqiideed, ama, ka dhan ah qof kasta oo ka faa'iidaysta, codsade, ama ka qaybqaatayaasha barnaamijyada dhaqaale ahaan lagu caawiyay ee hoos yimaada Title I ee Xeerka Hal-abuurka iyo Fursadaha shaqo, iyadoo lagu salaynayo heerka muwaadinimada qofka ama ka qaybqaadashada barnaamij ama hawl kasto oo dhaqaale lagu caawiyo ee WIOA Title I.

Qaatahu wa inaan lagu takoorin mid kamid ah waxyaabaha soo socda: go'aaminta qofka la aqbali doono, ama geli doonta, barnaamij ama hawl kasta oo dhaqaale oo WIOA Title I- lagu caawiyo; siinta fursadaha, ama daaweynta qof kasta ee ku saabsan, barnaamijka ama hawlaha sida; ama samaynta go'aanada shaqaalaynta ee maamulka, ama wax la xiriira, barnaamijka ama hawlaha noocaas ah.

Qaatayaasha kaalmada maaliyadeed ee dawlada dhexe waa inay qaadaan talaabooyin macquul ah si ay u hubiyaan in xiriirka lala yeesho shakhsiyaadka naafada ah ay waxtar u leeyihiin sida loo la xiriiro dadka kale. Tani waxay ka dhigan tahay, marka looga codsado si lacag la'aan shakhsiga, qaatayaasha waxaa looga baahan yahay inay siiyaan caawimaad iyo adeegyo ku habboon shakhsiyaadka naafada ah.

## WAXA LA SAMAYNAYO HADDII AAD AAMINSANTAHAY INAAD LA KULANTAY TAKOOR

Haddii aad u malaynayso in lagugu sameeyay takoorid barnaamijka ama hawsha dhaqaale ee hoos timaada WIOA Title I, waxaad ku xeraysan kartaa cabasho 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda xad-gudubka lagugu eedeeyay midkood: Qaataha Equal Opportunity Officer (ama qofka uu qaatuhu u qoondeeyay ujeedadan);

Christine Cassel, Operations Director
Department for Children and Families,
Commissioner’s Office 280 State Drive, HC1 North, Waterbury, VT 05671-1080
802-241-0927
AHS.DCFConsumerConcerns@vermont.gov

AMA: Director, Civil Rights Center (CRC), U.S. Waaxda Shaqada
**200 Constitution Avenue NW, Room N-4123, Washington, DC 20210**
ama si elektoroonig ah ayaa loogu diri websaytka CRC ee www.dol.gov/crc.

Haddii aad cabashadaada u gudbiso qaataha, waa inaad sugtaa midkood ilaa uu qofka qaataha ah ka soo saaro Ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan Talaabada Ugu Danbaysa, ama ilaa 90 maalmood ay dhaafaan (hadba goor hore) kahor inta aanad xarayn Civil Rights Center (eeg ciwaanka sare). Haddii qaatahu uusan ku siin Ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan Talaabada Ugu Danbaysa 90 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta aad cabashada gudbisay, waxaa laguu ogolyahay inaad cabasho u gudbiso CRC ka hor intaanad helin Ogeysiiskaas. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad ku gudbisaa cabashadaada CRC 30 maalmood gudahooda laga bilaabo 90 maalmood ee kama dambaysta ah (si kale hadii loo dhigo, 120 maalmood gudahooda kadib maalinta aad cabashadaada u gudbisay qaataha). Haddii qaataha uu ku siiyo Ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan Talaabada Ugu Danbaysa ee

cabashadaada, laakiin aadan ku qanacsanayn go'aanka ama xalinta, waxaad weli haysataa ikhtiyaarka ah inaad cabasho u gudbiso CRC. Waa inaad ku gudbisaa cabashadaada CRC 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda aad heshay Ogeysiiska Talaabada Ugu Danbaysa.

Waaxda Shaqada ee Vermont waxay hubisaa fursadaha siman ee shaqada iyo bixinta adeegga labadaba. Haddii aad naafo tahay oo aad u baahan tahay ka caawinta macluumaadkan, fadlan wac 7-1-1 Adeega Gudbinta ee Vermont. Fadlan wac 802-241-0927 oo riix 0 si aad u codsato macluumaad lacag la'aan ah oo qaab kale ah, oo ay kamid tahay turjumaada luuqada aad doorbidayso.

VERMONT
AGENCY OF HUMAN SERVICES
DEPARTMENT FOR CHILDREN & FAMILIES